BAYAANKA MACLUUMAADKA TALLAALKA

Tallaalka Jadeecada, Qaamo-qashiirta & Rubella (MMR)

(Jadeecada, Qaamo-qashiirta, iyo Rubella)

Waxaad u Baahan Tahay Inaad Ogaato

Bayaanno Macluumaad Tallaal oo farabadan ayaa lagu heli karaa luqadaha Isbaanishka iyo luqado kaleba. Ka eeg www.immunize.org/vis.

Hojas de Información Sobre Vacunas están disponibles en Español y en muchos otros idiomas. Visite http://www.immunize.org/vis

1 Waa maxay sababta la isu tallaalayo?

Jadeecada, qaamo-qashiirta, iyo rubella waa xanuun khatar ah. Kahor tallaallada ku dhicitaankoodu dadka aad ayuu ugu badnaa, gaar ahaan carruurta.

Jadeecada

- Fayraska jadeecadu wuxuu keenaa finan, qufac, duuf, il cuncun, iyo xummad.
- Waxay keeni kartaa infekshinka dhagaha, oof-wareen, suuxdinno (gariir iyo indho taagid), dhaawac maskaxeed, iyo geeri.

Qaamo-qashiirta

- Fayraska qaamo-qashiirta ayaa sababa qandho, madax-xanuun, iyo murqo-xanuun, cunno xumo, iyo qanjiraha oo barara.
- Wuxuu keeni karaa dhago la'aan, meningitis (infekshan ku dhaca xuubka maskaxda iyo xangulada), barar xanuun leh oo ah xiniinyaha ama ugxan-sidaha, iyo si dhif ah ma-dhaleysnimo.

Rubella (jadeeco Jarmal)

- Fayraska rubella wuxuu keenaa finan yaryar, lafo-xanuun (inta badan haweenka) iyo xummad dhexe.
- Haddii ay haweenay rubella qaado iyada oo uur leh, way dhicin kartaa ama ilmaheeda ayaa ku dhalan kara cilado dhalasho oo halis ah.

Cuduradani waxay ku faafaan qof ka qof iyaga oo mara hawada. Si fudud ayaad u qaadi kartaa adiga oo ku dhawaada agagaaraha qof infekshinka qaba.

Tallaalka jadeecada, qaamo-qashiirta iyo rubella (MMR) ayaa ka ilaalin kara carruurta (iyo dadka qaan-gaarka ah) saddexdan cudur dhammantoodba.

Iyada oo mahadda ay iska leeyihiin barnaamijyada tallaalka ee lagu guuleystay, cudurradani intii hore aad bay uga tiro yar yihiin maanta marka loo eego markii hore. Laakiin haddii aan joojino tallaalitaanka wey soo noqon doonaan.

2 Ayey tahay inay hesho tallaalka MMR iyo goorma?

Carruurtu waa inay heshaa 2 qiyaasood oo tallaalka MMR ah:

– Qiyaasta Kowaad: da'da 12-15 bilood jir

– Qiyaasta Labaad: da'da 4-6 sano jir (laga yaabaa in la siiyo ka hor, haddii ugu yaraan ay tahay 28 maalmood kadib qiyaasta 1-aad)

Dhallaanka ka yar 12 bilood ayaa ah in la siiyo qiyaas MMR haddii ay ay u socdaalayaan dalalka dibadda. (Qiyaastan ugu tirsami meyso taxanahooda caadiga ah)

Dadka waaweyn qaar waa inay sidoo kale helaan tallaalka MMR: Sida qaalibka ah, cid kasta oo 18 jir ah ama ka wayn oo dhashay kadib 1956 waa inuu helaa ugu yaraan hal qiyaas oo tallaalka MMR ah, haddii kale waa inay tusin karaan inay qaateen tallaalka ama ay ku dhaceen saddexda cudurba giddigood.

Tallaalka MMR waxa la siin karaa xilli la mida tallaalada kale.

Carruurta u dhexeysa da'da 1 iyo 12 sano ayaa heli kara tallaal "isku-jira" oo loo yaqaan MMRV, oo leh labadaba tallaal ee MMR iyo busbuska (hablo-baasta). Waxa jira Bayaan Macluumaad Tallaal gooni ah oo loogu talagalay MMRV.

3 Dadka qaar waa inayna qaadan tallaalka MMR ama sugaan.

- Ciddii mar uun ku yeelatay dareen-celin ama xasaasiyad nafta halis u ah antibayootikada neomycin, ama wax kale oo tallaalka MMR ka kooban yahay, ayaa ah inayna qaadan tallaalka. Waxaad u sheegtaa dhakhtarkaaga haddii aad leedahay alerjiyo daran.
- Ciddii mar uun ku yeelatay dareen-celin ama xasaasiyad nafta halis u ah kadib qiyaas tallaal hore oo ahaa tallaalka MMR ama MMRV waa inayna qaadan tallaal kale.
- Dadka qaarkood ee buka wakhtiga ballanta tallaalka loo qabtay ayaa laga yaabaa in lagula taliyo inay sugaan ilaa iyo intay ka bogsanayaan kahor inteyna qaadan tallaalka MMR.
- Haweenka uurka lehi ma ha inay qaataan tallaalka MMR. Haweenla uurka leh ee u baahan tallaalka waa inay sugaan illaa intay ummulayaan. Haweenku waa inay iska ilaaliyaan inay uur qaadaan illaa 4 toddobaad oo ka dambeeya tallaalka.

U.S. Department of Health and Human Services
Centers for Disease Control and Prevention

- U sheeg dhakhtarka haddii qofka la siinayo tallaalka:
  - Uu leeyahay HIV/AIDS, ama cudur kale oo saameeya habdhiska difaaca
  - Lagu daawaynayo daawo saamaynaysa habdhiska difaaca, sida steroids
  - Uu leeyahay nooc kansar uun ah
  - Laga dawaynayo kansar oo la isticmaalayo shucaac ama daawooyin
  - Uu mar uun yeeshay unugyada dhiig xinjirowga sameeya oo aad u yaraaday (cilad dhiig)
  - U qaatay tallaal kale guda 4-tii toddobaad ee la soo dhaafay
  - Lagu shubay dhiig dhawaan ama qaatay waxyaabo kale oo dhiig ka sameysan

  Mid kasta kuwaas ayaa sabab u noqon kara inaan la qaadanin tallaalka, ama la daahiyo tallaalka illaa goor dambe.

4 Waa maxay halista ka iman karta tallaalka MMR?

Tallaalku, sida daawada kale, wuxuu awoodaa sababidda dhibaatooyin halis ah, sida dareen-celinta xasaasiyadda daran.

Khatarta uu tallaalka MMR ku keeni karo dhibaato culus, ama geeri, aad ayeey u yar tahay.

Qaadashada tallaalka MMR aad ayay uga ammaan badan yahay qaadista jadeecada, qaamow-qashiirta ama rubella.

Dadka qaata tallaalka MMR badankoodu wax dhib ah kalama kulmaan.

Dhibaatooyin Aan Darnayn
- Xummad (illaa 1 qof 6-dii qof)
- Finan dhexe (qiyaastii 1 qof 20-kii qof)
- Bararka qanjirada dhabanka ama qoorta (illaa 1 qof 75-kii qofba)

Hadday dhibaatooyinkani dhacaan, inta badan waa 6-14 cisho gudahood mudista kadib. Waxay u dhacaan sidaa si ka yar kadib qiyaasta labaad.

Dhibaatooyinka Dhexdhexaadka ah
- Suuxdin (is-gundhin ama indho taag) ay keentay xummad (illaa 1 marka loo eego 3,000 qiyaasood)
- Xanuun mudo gaaban iyo qallafsanaan laabatooyinka ah, oo sida badan ah dhowr iyo toban jirka ama dumarka waaweyn (illaa 1 qof 4-tii qof)
- Nooca unugyada dhiig xinjirowga sameeya oo aad u yaraada, taasoo keeni karta cilad dhiigbax (illaa 1 marka loo eego 30,000 qiyaasood)

Dhibaatooyinka Daran (Aad dhif u ah)
- Dareen-celinta xasaasiyadeed ee halista ah (wax ka yar 1 milyankii qiyaaso tallaal)
- Dhibaatooyin daran oo dhowr ah oo kale ah ayaa lagu soo waramay kadib markuu ilmuhu qaato tallaalka MMR, kuna jiraan:
  - Dhago la'aan
  - Suuxdinno muddo dheer, ama miyirka oo hoos u dhaca
  - Dhaawac maskaxeed oo daa'im ah

  Kuwan dhicitaankoodu waa dhif oo lama hubin karo inuu tallaalku sababayo iyo in kale.

5 Maxaa dhacaya haddii ay dhacaan diidmooyin ama alerjiyo daran?

Maxaa ila habboon inaan u fiirsado?
- Xaalad kasta oo aan caadi ahayn, sida xummad badan ama dhaqan aan caadi ahayn. Calaamadaha halista ah ee dhibaatada xasaasiyadda daran waxaa ka mid noqon kara neefsashada oo adkaada, xabeeb ama hinraagid, furuuruc cuncun leh, midabka qofka oo cawlnaada, wadno garaac badan iyo wareer.

Maxaan sameeyaa?
- U wac dhakhtar, ama qofka dhakhtarka u gee isla markaaba.
- U sheeg dhakhtarkaaga waxa dhacay, taariikhda iyo waqtiga ay dhacday, iyo markii tallaalka la qaatay.
- Waxaad weydiisataa dhakhtarkaaga in uu warbixin ka gudbiyo dareen-celinta oo u ku xeereeyo Nidaamka Ka Warbixinta Dhacdada Daran ee Tallaalka (Vaccine Adverse Event Reporting System, VAERS) foomkeeda. Ama waxaad buuxin kartaa warbixintan adiga oo u sii marinaya VAERS barteeda internetka ee ku taal www.vaers.hhs.gov, ama adiga oo waca 1-800-822-7967.

VAERS ma bixiso talo caafimaad.

6 Barnaamijka Magdhawga Dhaawaca Tallaalka Qaranka (National Vaccine Injury Compensation Program)

Barnaamijka Magdhawga Dhaawaca Tallaalka Qaranka (VICP) waxaa la abuuray badhtameeyihii sannadkii 1986.

Dadka rumaysan inuu tallaal dhaawacay waxay wax ka ogaan karaan barnaamijka iyo sida loo xereysanayo cabasho iyagoo waca 1-800-338-2382 ama booqda websaaydka VICP ee www.hrsa.gov/vaccinecompensation.

7 Sidee baan macluumaad intaas dhaafsiisan u ogaan karaa?

- Weydii dhakhtarkaaga.
- Wac waaxda caafimaadka deegaankaaga ama gobolkaaga.
- La Xiriir Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (CDC):
  - Waxaad wacdaa 1-800-232-4636 (1-800-CDC-INFO) ama
  - Booqo bogga internetka ee CDC oo ku taal www.cdc.gov/vaccines

---

Vaccine Information Statement (Interim)

MMR Vaccine

4/20/2012 Somali

42 U.S.C. § 300aa-26

Office Use Only

Translation provided by Immunization Action Coalition